Regular School Attendance

Joogta u Imaanshaha dugsiga

Macluumaad loogu talagalay waalidiinta iyo xannaaneeyayaasha

Ma ogtahay? Haddii ardeydu ay gafaan ugu yaraan ilaa sideed maalmood oo ka mid xilliga dugsiyeedka, dhammaadka dugsiga hoose/dhexe waxay gafayaan sannad waxbarasho.

Waa maxay sababta aan ilmaheyga dugsiga ugu dirayo?

Waxbarashadu New South Wales waa khasab. Tan micnaheedu waxaa weeye in dhammaan carruurta lix sanno jirta laga bilaabo iyo da'da ugu yar ee dugsi lagaga bixi karo sharci ahaan looga baahan yahay inay dugsi dhigtaan.

Laga bilaabo 2010, dhammaan ardeyda New South Wales waa inay dhameeyaan Year 10. ka dib Year 10 iyo ilaa ay ka gaadhayaan 17 sanno ardeydu waa inay:

1. dugsi ku jiraan ama ka diiwaangashan yihiin dugsiga guriga, ama
2. waxbarasho la ansixiyey ama tababar (tusaale TAFE, shaqo barasho, shaqo ku tababarid) ama
3. ku jiraan shaqo wakhti buuxa leh oo mushaari ah (celcelis ahaan 25 saac toddobaadkii) ama isku darka shaqo, waxbarasho iyo/tababar.

Maamulayaashu sharci ahaan waa ka masuul inay hayaan diiwaanka saxda ah ee imaanshaha ardeyga.

Maamulayaashu waxay sidoo kale masuul ka yihiin in go'aamiyaan haddii sababta maqnaashaha keentay ay tahay mid cudurdaar leh.

Sababtan darteed, maamulayaasha waxaa laga yaabaa inay codsadaan shahaadooyinka caafimaadka ama wixii dukumiinti kale ah ee maqnaashaha dheer ama soo noqnoqda oo ay waalidiintu u sharxeen jiro darteed.

Haddii maamulayaashu aanay u arag inay sharaxaadu tahay mid lagu qanci karo, waxay u diiwaangelinayaan maqnaanshaha mid aan wax macquul ah la sheegan.

Waxaa muhiim ah inaad fahamto New South Wales Department of Education and Training waxaa laga yaabaa inay dacweeyaan waalidka (oo ay ku jiraan xannaaneeyayaashu) haddii carruurta ku jira da'da dugsigu khasabka yahay ay leeyihiin maqnaansho soo noqnoqda

Mayeyna ahayn inaan diro ilmaheyga maalin kasta?

HAA. Waa shuruuda qoritaanka inaad ilmahaaga u dirto dugsiga maalin walba.

Tiro yar oo maqnaansho ah ayaa laga yaabaa in loo cudurdaaro haddii ilmahaagu:

- uu aadayo xaflad diimeed khaas ah
- laga doonayo inuu ka qaybgalo xaalad daran iyo/ama mid qoys oo degdeg ah (tusaale aas)
- Inuu aad u jiran yahay oo uusan tegi karin dugsiga ama uu qabo jirooyinka infekshinka leh.

Injirta madaxa oo ku badatay waxay noqon kartaa wax badanaa dhaca gaar ahaan dugsiyada hoose/dhexe. Waalidiintu waa inay si joogta ah uga jeegareeyaan injir timaha ilmahooda oo ay sameeyaan daaweyn marka ukun ama injir madaxa lagu arko.

Macluumaad la turjumay oo ku saabsan injirta madaxa iyo sida loo daaweeyo waxaa laga helayaa:

https://www.det.nsw.edu.au/languagesupport/documents/headlice/infosheet.htm

Tallada Caafimaadka NSW waxay tilmaameysaa inaan loo baahneyn in carruurta guriga lagu celiyo ama laga saaro dugsiga sababtuna tahay injirta madaxa darted. Injrta madaxa, ma aha sabab ku filan oo wakhti dheer loogaga maqnaado dugsiga.

Maa maxay sababta imaansho joogta ahi oo dugsiga ahi muhiimka u tahay?

Imaanshaha joogtada ah ee dugsiga wuxuu caawinayaa in ilmahaagu ku guuleysto noloshiisa danbe.

Imaanshaha dugsiga maalin kasta waxay ka dhigeysaa wax barashada mid sahlan ilmahaaga waxayna caawineysaa carruurta inay sameystaan oo heystaan saaxiibtinimada carruurta kale.

Haddii ilmahaagu uusan baran xirfadaha aasaasiga ah sanadaha ugu horeeya ee dugsiga, waxaa laga yaabaa inay yeeshaan dhibaato waxbarasho sanadaha danbe.

NEW SOUTH WALES DEPARTMENT OF EDUCATION AND TRAINING

Waa maxay sababta imaanshaha dugsigu muhiimka u yahay?

Imaanshaha dugsiga iyo fasalka wakhtigii la rabay:

- Waxay hubineysaa in ilmahaagu uusan gafin qorshaha nashaadka waxbarashada ee muhiimka ah (schedule) maalinta horaanteeda markay ugu soo jeedid badan yihiin
- Waxay ka caawineysaa ilmahaagu inuu barto muhimada wakhtiga ku imaanshahiisa iyo waxyaalaha soo noqnoqda.
- Waxay siineysaa ilmahaaga wakhti uu ku salaamo xaasibadii fasalka ka hor sidaa daraadeed
- Waxay yareysaa fursada rabshada fasalka.

Soo daahida waxaa loo diiwaangelinayaa maqnaansho qaybeed waana in loogu sharxaa dugsiga isla sida loo sharxo maqnaanshaha kaleba.

Maxaan sameeyaa haddii qoyskayagu aadayo fasax wakhtiga dugsiga?

Waalidiinta iyo xannaaneeyayaasha waxaa lagu dhiirigelinayaa inaysan ka kaxeyn carruurtooda dugsiga fasax qoys awgeed. Qoysasku waa inay ku dayaan inay ku habeeyaan fasaxyadooda fasaxyada dugsiga.

Haddii fasaxa qoyskaagu uu yahay inta lagu jiro wakhtiga dugsiga, u wargeli maamulaha dugsiga hore codsana fasax iyo/ama in dugsiga lagaa daayo wakhtigaas.

Iyadoo ku xiran xaaladaha iyo intay noqon karto maqnaantu, waxaad weydiisan kartaa in dugsigu ku siiyo hawl uu dhammeyn karo ilmahaagu inta uu maqan yahay.

Ma waajibaa in Ilmaheygu ka soo qaybgalo dhammaan nashaadka oo ay ku jiraan jirdhis maalmeedka iyo cayaaraha?

HAA. Ciyaaraha iyo nashaadyada kale waxy ka caawiyaan inuu ilmahaagu caafimaad qabo. Carruurta waxaa laga filayaa inay yimaadaan dhammaan nashaadka dugsiga ee joogtada ah, oo ay ciyaaruhu ka mid yihiin.

Dugsiga ha uga reebin ilmahaaga waxyaalaha soo socda:

- dhalashada
- wax soo gadashada
- heynta carruurta kale
- jeegareynta joogtada ah ama daryeelka sida timada jarida
- dhacdooyinta qoyska ee yar yar
- cid kale inay la soo seexdaan.

Ballamaha daawada iyo caafimaadka kale ee ilmahaaga waa in la sameeyaa midkood dugsiga ka hor ama ka dib ama inta lagu jiro fasaxyada dugsiga.

Maxaan sameeyaa haddii ilmaheygu uu dugsiga ka joogayo?

Haddii ilmahaagu dugsiga ka maqnaanayo, waa muhiim inaad u sheegto dugsiga oo sheegtaa sababta maqnaanshaha ilmahaaga. Si aad u sharaxdid maqnaanshaha waalidka iyo xannaaneeyayaashu waxay:

- u diri karaan qoraal, fakis ama iimeyl dugsiga
- taleefan ayey u diri karaan dugsiga, ama
- dugsiga booqo

Dhammaan maqnaanshaha waa in loo sharxaa dugsiga. Qoraalo laba af ku qoran iyo macluumaad dheeraad ah oo imaanshaha ah waxaa laga heli karaa website ka Wasaaradda oo ka hoose School Attendance (imaanshaha dugsiga) ee ah

https://www.det.nsw.edu.au/languagesupport/documents/index_s.htm

Maamulaha dugsigu wuxuu xaq u leeyahay inuu su'aalo ka weydiiyo codsiyada waalidka ama xannaaneeyayaasha ee ah in ilmahoodu ka maqnaado dugsiga.

Maamuluhu wuxuu sidoo kale su'aal ka weydiin karaa sharaxaad kasta oo ay u bixiyaan maqnaanshaha ilmaha ee dugsiga.

Ilmaheygu ma tegi doono dugsiga. Maxaan sameeyaa?

Waa inaad la xirriirtaa maamulaha dugsiga isla markiiba si aad ugala hadasho arinta oo aad caawimaad weydiisataa. Maamuluhu wuxuu taageero weydiisan karaa sarkaalka xirriirka dugsiga guriga ama sarkaalka xirriirka ardeyga ee Aborjuniiska.

Waa kuwama saraakiisha xirriirka dugisga guriga iyo saraakiisha xirriirka ardeyda Aborjuniiska?

Saraakiisha xirriirka dugsiga guriga iyo saraakiisha xirriirka ardeyda Aborjuniiska waxaa si khaas ah loogu tababaray inay kaa caawiyaan adiga imaanshaha ilmahaaga.

Waxay la shaqeeyaan dugsiyada bulshada si ay u dhiirigeliyaan dhammaan ardeydu inay si joogta ah u yimaadaan dugsiga.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan Barnaamijka Xirriirka Dugsiga Guriga waa inaad la xirriirtaa maareeyaha barnaamijka xafiiska Tababarka gobolka Wasaaraddada Waxbarashada ee xaafaddaada. Lambarada lagala xirriiro waxaa laga laga heli karaa cinwaanka website ka:

www.det.nsw.edu.au/contactus/index.htm ama adoo taleefan u diraya 131 536.

Wax dhibaato ah miyaad qabtaa oo ah keenida ilmahaaga dugsiga sababahan soo socda awgood?

- sariirta kama soo baxayo
- ma seexanayo
- ma heli karaan dharkooda, buugtooda, shaqadooda guriga, boorsadooda dugsiga….
- qadadii dugsigu diyaar ma aha
- aad buu ugu gaabiyaa quraac cunida
- shaqadii guriga ma sameyn
- telefishinka ayuu daawadaa habeenkii wakhti danbe ama markay u diyaar garoobi lahaayeen dugsiga
- imtixaanka dugsiga ama wax soo jeedinta
- dhalashooyinka
- Waa ooyayaa imana sii deynayo.

Halkan waxaa ah qaar tallooyin ah oo ku saleysan dejinta waxyaalo si joogta ah loo sameeyo:

- Wuxuu leeyahay wakhti go'an oo uu sariirta ka soo kaco
- wakhti uu seexdo
- habeenka ka horeeya hala diyaariyo dharka dugsiga iyo boorsada
- samee qadooyinka habeenka ka horeeya
- Wakhti u goo lagu bilaabo quraacda/ oo lagu dhammeeyo. Waxa soo noqnoqdaa waa muhiim
- Wakhti u samee waxqabadka shaqadada guriga ee maalinlaha ah
- Telefishinka demi wakhti go'an oo keliya haddii ay haboon tahay
- Ku adkayso, oo carruurtu waa inay dugsiga aadaan
- Sii dhiirigelin fiican oo fara badan
- Ku adkow, maalinta dhalashdu ma aha fasax
- Wakhtiga imaanshaha dugsiga oo ay isku mar dhacaan wakhtiga gambaleelka iyo dhakhsa u bixida. Haddii aad macalin hore ula ballantay, gacanta ilmahaaga u geli macalinka ka dibna bax.

Ma u baahan tahay turjumaan?

Adeegyada turjumaanka ayaa loo qabtaa waalidiinta iyo xannaaneeyayaasha aan ku hadlin Ingiriiska ama u fahmin si fiican iyo waalidiinta Dhegaha la iyo xannaaneeyayaasha isticmaala luuqada dhagoolaha meeshii suurtogal ah. Wixii macluumaad dheeraad ah ee adeegyada turjumaanka la xirriir dugsigaaga ama taleefan u dir Adeega Turjumaada Taleefanka hana kuula xirriiraan dugsiga. Lambarka taleefanka la wacayo waa 131 450. Weydiiso turjumaanka luuqada loo baahan yahy turjumaankaana wici doona dugsiga oo khadka ku jiri doona si uu kaaga caawiyo wada-hadalka. Adeegan wax lacag ah laguguma dalici doono.

© March 2010
Student Welfare Directorate
NSW Department of Education & Training